


# QORSHAHA GUUD EE GAROONKA JOOGTADA AH (SAMP) - DIB U EEGISTA DEEGAANKA NEPA

## GUUD AHAAN

### 1. WAA MAXAY QORSHAHA GUUD EE MADAARKA JOOGTADA AH?

Qorshaha Guud ee Garoonka joogtada ee (SAMP) waa naqshadaynta isbeddelada Garoonka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA) si loo daboolo mustaqbalka, baahida la saadaaliyay. SAMP waxay aqoonsatay 31 Mashruuc oo Muddada-Dhow (NTPs) kuwaas oo loogu talagalay inay u adeegaan 56 milyan oo rakaab ah sannadkii iyo sidoo kale duullimaadyada iyo dhaqdhaqaaqa xamuulka ee heerka ugu wanaagsan ee adeegga, sida ay qeexday Ururka Caalamiga ah ee Duulista Hawada (IATA).

SAMP NTP-yada waxay heleen oggolaansho shuruudaysan oo ka socota FAA waxaana dhamaystiran habka qorshaynta ee dib u eegista deegaanka ee NTP-yada ayaa la dhamaystiray.Hadda, Xeerka Siyaasadda Deegaanka Qaranka (NEPA) dib u eegista deegaanka ayaa socota, iyadoo dukumeentiga qabyada ah ee NEPA la filayo in la sii daayo dayrta 2024. Marka habka NEPA la dhammeeyo, dib u eegista Xeerka Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka (SEPA) ayaa raaci doonta.

### 2. WAA MAXAY MASHAARIICDA LA SOO JEEDIYAY?

Qodobada muhiimka ah ee NTP-yada (tusaale ahaan, Talaabada La Soo Jeediyay) waxay ka mid yihiin dhismaha terminalka labaad, xarunta dayactirka ee dhexe, xarumaha maareynta xamuulka ee ka baxsan garoonka, dib-u-habeynta waddooyinka garoonka, iyo ballaarinta goobaha shidaalka. Waxyaabaha muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Terminal labaad oo leh 19 albaab oo dheeraad ah
- Wada diyaaradaha ee sarreeya iyo saldhigyada isku xidha xarunta baabuurta kirada ah ee jira, terminalka cusub, iyo terminalka wayn
- Xarumaha xamuulka oo lagu beddelayo kuwa hadda jira looguna talagalay qaadista xamuulka hawada
- Dib-u-habaynta waddooyinka garoonka diyaaradaha
- Cusboonaysiinta garoonka diyaaradaha si loo hagaajiyo badbaadada iyo waxtarka
- Kaabayaasha baarkinka cusub si loogu adeego terminalka labaad
- Xarumo dheeri ah oo loogu talagalay shidaalka duulimaadyada

### 3. MAXAA LOO BALAADHIYEY SEA?

Daraasad aasaasi ah oo duullimaad goboleed ah oo ay sameeyeen 2021 Golaha Gobolka Puget Sound waxay ogaadeen, iyadoo lagu saleynayo baahida la saadaaliyay, inay jiri doonto 27 milyan oo rakaab ah sannadkii marka loo eego SEA ay qaadi karto heerka ugu wanaagsan ee adeegga 2050. Haddii aan la helin tas-hiilaad cusub oo loogu talagalay baahida mustaqbalka ee la saadaaliyay, ciriiriga ka jira SEA waxay kordhin doontaa, taasoo keenaysa dib u dhac dheeraad ah iyo heerka adeegga oo sii xumaada.

## TALAABOOYINKA LA SOO JEEDIYAY

### 1. MAXAY YIHIIN WAXYAABAHA KALE EE LA TIXGELINAYO?

Beddelka waxaa ka mid ah Talaabada la soo jeediyay, Xulashada Terminalka Isku-dhafka ah, iyo Beddelka Waxqabad La'aan. Labada Waxqabad ee la soo jeediyay iyo Xulashada Terminalka Isku-dhafka ah waxay ku lug leeyihiin horumarin, iyadoo Xulashada Terminalka Isku-dhafka ah ay soo jeedinayso dhismaha terminal cusub iyo albaabo. Beddelka Waxqabad la'aan ma laha ficillo federaali ah oo dheeri ah ama horumarin guud.

### 2. WAA MAXAY SAAMAYNTA DEEGAANKA EE KA IMAN KARA TALAABOOYINKA LA SOO JEEDIYAY?

Qiimaynta Deegaanka (EA) waxay aqoonsatay saamaynta tayada hawada, qaylada , iyo gaadiidka dhulka ku socda . Si kastaba ha ahaatee, iyada oo la raacayo tillaabooyinka yaraynta saxda ah, saamayntan waxa la filayaa in ay ka sii hooseeyaan heerar muhiim ah.

### 3. SIDEE BUU MASHRUUCU U SAAMAYNAYAA GAADIIDKA MAXALIGA AH?

Mashruuca saamayn kuma yeelanayo gaadiidka dhulka ku socda ee deegaanka ee la falanqeeyay. Iyadoo laga yaabo in isgoysyada qaar ay la kulmaan saxmad badan, Dekeddu waxay soo jeedisay xeelado lagu dhimayo, sida in lagu daro calaamadaha taraafigga, ballaarinta waddooyinka, iyo in la dhiso waddooyin wareeg ah si loo hagaajiyo socodka gaadiidka.

### 4. WAA MAXAY TALLAABOOYINKA YARAYNTA EE LA FULIN DOONO SI LOO YAREEYO SAAMAYNTA DEEGAANKA?

Tallaabooyinka lagu yaraynayo waxaa ka mid ah qorshayaasha ka hortagga wasakhowga, nidaamyada maaraynta biyaha dabaylaha, soo celinta dhulka qoyan, iyo qorshayaasha qashin-qubka walxaha khatarta ah. Tallaabooyinkani waxay ujeedadoodu tahay in la yareeyo ama la baabi'iyo saamaynta deegaanka ee muhiimka ah inta lagu jiro iyo ka dib dhismaha.



# DIB U EEGISTA DEEGAANKA

## 1. MAXAY TAHAY UJEEDADA DIB U EEGISTA DEEGAANKA?

Ujeedada dib u eegista deegaanku waa in la qiimeeyo saamaynta deegaanka ee ka iman karta mashruuca la soo jeediyay ka hor inta aan la fulin. Ujeedooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Go'aan-qaadasho xog-ogaal ah
- Daah-furnaan buuxda iyo ka-qaybgalka dadweynaha ee habka go'aan-qaadashada
- U hoggaansanaanta sharciyada iyo xeerarka
- Aqoonsiga siyaabaha looga fogaado, loo yareeyo, ama loo dhimo saameynta

## 2. WAA MAXAY FARAQA U DHEXEEYA NEPA IYO SEPA?

Xeerka Siyaasadda Deegaanka Qaranka, ama NEPA, waa siyaasad federaali ah oo u baahan hay'adaha federaalku inay qiimeeyaan saamaynta deegaanka ee talaabooyinkooda la soo jeediyay ka hor intaanay go'aannada gaarin oo ay siiyaan fursado fikradda dadweynaha. Maamulka Duulimaadyada Federaalka waa hay'adda hormuudka u ah NEPA.

Xeerka Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka, ama SEPA, wuxuu u baahan yahay hay,adaha heer gobolka inay sidaas oo kale sameeyaan. Ka dib NEPA EA, Dekeddu waxay samayn doontaa dib u eegis deegaan oo gaar ah oo hoos timaada SEPA.

## 3. WAA MAXAY QIIMAYNTA DEEGAANKA (EA)?

Qiimaynta Deegaanka (EA) ayaa loo diyaariyey si loo go'aamiyo haddii ficilka federaalku uu yeelan doono saameyn weyn. Tallaabo kasta oo aan si gaar ah looga saarin oo aan u baahnayn Bayaanka Saamaynta Deegaanka (EIS), waxay leedahay saamayn aan la hubin, ama leh arrimo deegaan oo aan la xallin, waxay u baahan tahay diyaarinta EA.

## 4. SIDEEN UGA FAALLOON KARAA QABYO-QORAALKA EA?

Ka faalloodashada qabyo-qoraalka EA waa hab muhiim u ah dadweynaha si ay uga qaybqaataan habka dib u eegista deegaanka oo ay gacan uga geystaan habka go'aan qaadashada. Dekadda waxaa ka go'an hab la heli karo, oo la fahmi karo habka faallooyinka dadweynaha.

Xubnaha dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan inay dib u eegaan macluumaadka lagu turjumay lix luuqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro xilliga faallooyinka shir dadweyne, online, iimayl, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli doonaa mareegta SAMP, Xarunta Shirarka Garoonka SEA, iyo maktabadaha dadweynaha ee Burien, Des Moines, Federal Way, koonfurta Seattle, SeaTac, iyo Tukwila. Faallooyinku waa inay bixiyaan tafaasiil ku filan hay'adda si ay u fahamto booska faallooyinka iyo sababta arrimaha la soo qaaday

Soo gudbi faallo dadweyne waqtiga kulanka dadweynaha adiga oo nagu soo biiraya:

- Talaado, Nofeembar 12, Dugsiga Hoose ee Wildwood, Federal Way, 6-8 galabnimo
- Arbacada, Nofeembar 13, Dugsiga Sare ee Mt. Rainier, Des Moines, 6-8 galabnimo
- Khamiis, Nofeembar 14, Dugsiga Sare ee Highline, Burien, 6-8 galabnimo
- Sabti, Nofeembar 16, Dugsiga Hoose ee McMicken Heights, SeaTac, 10 subaxnimo - 12 galabnimo



Ku soo gudbi faallada dadweynaha onlayn adigoo istricmaalaya  mareegaheena ama adoo noogusoo diraya iimaylka:

- Iimayl: samp@portseattle.org
- Website: https://www.sampntpenvironmentalreview.org/

Ku soo gudbi faallooyinka dadweynaha boosta:

Mr. Steve Rybolt
Port of Seattle, Aviation Environment and Sustainability
P.O. Box 68727, Seattle, WA 98168

Haddii loo baahdo caawimaad maqal, muuqaal, ama luuqadeed fadlan noo reeb fariin ama soowac 206-339-0213.

## 5. INTEE IN LE'EG AYAY NOQON DOONTAA XILLIGA FAALLOOYINKA DADWEYNAHA?

FAA waxay xaqiijisay muddo 45 maalmood ah oo faallo ah taasoo ka dhalatay Dekadda oo codsatay in la kordhiyo muddada 30-ka maalmood ee faallooyinka dadweynaha ee NEPA EA. Dekeddu waxay codsatay in la kordhiyo sababtoo ah xilli fasax ah oo mashquul ah, kakanaanta iyo dhererka falanqaynta, iyo hubinta helitaanka dadka madow, kuwa asaliga ah, dadka midabka leh (BIPOC), iyo bulshooyinka kale ee taariikh ahaan aan la matalin.

Cusbooneysiin: Saaxiibadayada federaalka ee FAA waxay kordhiyeen Wakaaladda iyo muddada faallooyinka dadweynaha ilaa 53 maalmood si ay wax uga sheegaan. Muddada faallooyinka waxay xidhmi doontaa Jimcaha, Diseembar 13, 2024.

## 6. MAXAA DHACAYA XILLIGA FAALLOOYINKA KA DIB?

Dhammaadka xilliga faallooyinka, dhammaan faallooyinka la helo waxaa dib u eegi doona oo tixgelin doona FAA iyo Dekedda inta lagu jiro diyaarinta EA kama dambaysta ah. Jawaabaha faallooyinka waxaa lagu dari doonaa EA da kama dambeysta ah.

## 7. SIDEE BAAD BULSHOOYINKA ULA FALGALAYSAA INTA LAGU JIRO HABKA DIB-U-EEGISTA DEEGAANKA?

Dadaalka ka-qaybgalka dadweynuhu waxa uu la jaan-qaadayaa marxaladaha muhiimka ah ee mashruuca dhammaan marxaladaha habka dib-u-eegista deegaanka iyada oo loo marayo khadka, qof ahaan, iyo ka-qaybgalka farsamada. Dekadda waxaa ka go'an hab la heli karo, oo la fahmi karo habka faallooyinka dadweynaha. Marka xilliga faallooyinka dadweynuhu furmo Oktoobar 21, 2024, xubnaha dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan inay dib u eegaan macluumaadka lagu turjumay lix luuqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro xilliga faallooyinka shir dadweyne, online, iimayl, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli doonaa mareegahayaga iyo maktabadaha

## 8. SIDEEN WAX BADAN U BARAN KARAA OO AAN ULA SOCON KARAA NIDAAMKA SAMP EE DIB U EEGISTA DEEGAANKA?

Si aad wax badan uga barato, booqo mareegteena mashruuca www.sampntpenvironmentalreview.org. Waxa kale oo aad iska diiwaan gelin kartaa si aad u hesho iimaylo si aad u cusboonaysiiso inta lagu jiro dib u eegista deegaanka ee SAMP Mashaariicda Muddada dhow adiga oo dooranaya sanduuqa ogeysiinta Qorshaha Guud ee Joogtaynta Garoonka ee ka hooseeya qaybta “Wărarka Joogtaynta Deegaanka” ee https://subscribe.portseattle.org/publications.:

La cusbooneysiiyay Noofambar 11, 2024